



# FAMIS

## Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Virginia ee loogu talloagalay Carruurta

*Illaalada Carruurtaada waxay Mudanyihiin Qiimo Aad Goyn Kartid!*

### Waa maxay FAMIS iyo Medicaid oo loogu talloagalay carruurta?

**FAMIS** waa barnaamijka caymiska caafimaadka Virginia ee loogu talloagalay carruurta. Waxay bixisaa helitaan adeegyada caafimaadka tayeysan ee loogu talloagalay carruurta aanan laheyn caymiska caafimaadka. **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah** ayaa sidoo kale bixisaa faa'idooyin badan oo daboosha carruurta ku jirto qoysaska ee leh daqliga hoose ama daqliga aan laheyn, xittaa haddii carruurta ay ku daboolanyihiin caymiska caafimaadka. Markii aad codsatid caymis, carruurtaada waxaa loo tixgelinayaa labadaba **FAMIS** iyo **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah**.

### Waa Maxay Daboolida?

- Booqashooyinka dhaqtarka
- Daryeelka isbitaalka iyo xaalada degdega ah
- Baaritaanada fiicnaanta canuga iyo fiicnaanta ilmaha
- Cirbadaha
- Daawooyinka dhaqtarka qoro
- Baaritaanada iyo raajooyinka
- Daryeelka aragga iyo ilkaha
- Daryeelka caafimaadka maskaxda
- Iyo wax badan....

Ma jiraan qarashaadka bil-laha ama sannadlaha ku aadan qoyskaaga leh **FAMIS** ama **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah**. Wixii carruurta ka diiwaangashan **FAMIS** kaliya, waxaa jiro lacag wada bixin yar (\$2 ama \$5) oo daryeelka caafimaadka qaar.

### Yaa u Qalma?

Carruurta way u qalmi karaan **FAMIS** ama **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah** haddii ay:

- Ku noolyihiin Virginia iy ay ka yaryihiin 19 sanno jir
- Miyay muwaadaniinta Mareykanka (qaarkood aan muwaadinka aheyn sidoo kale u qalmaan) Muwaadinnimada waalidka lama tixgelin
- Buuxi sharuuda daqliga qaar (fiiri jadwalka xiggo)

### Xadeynada Daqliga FAMIS (Guud ahaan\*)

Cabirka Qoyska	Bil-laha	Sannadlaha
1	\$2,491	\$29,889
2	\$3,369	\$40,426
3	\$4,247	\$50,963
4	\$5,125	\$61,500
5	\$6,004	\$72,037

*\*Laga bilaabo Janaayo 20, 2023. Xadeynada daqliga waxaa la saxaa sannad walba. U soo wac tilmaamo dheeraad ah.*

Qoysaska muhaajirka ee leh carruurta diiwaangashan laguma qori doono dalacaada dadweynaha. Helitaanka **FAMIS** ama **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah** ma saameyneyso awooda qoysaska ee lagu helayo muwaadinnimada Mareykanka.

### Sidee Ayaan u Codsadaa?

Codsashada **FAMIS** iyo **Medicaid oo loogu talloagalay carruurta ah** waa diyaar.

Kaliya soo wac taleefonka bilaashka ah 833-5CALLVA. Turjubaanada waa la heli karaa. Wakiiladeena ayaa kugu xirayo qof ku hadlo luuqadaada aad doorbidid.

Ama gal [commonhelp.virginia.gov](http://commonhelp.virginia.gov) si aad obleenka uga codsatid.

Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa [Waaxdaada Adeegyada Bulshada](#).

Wixii liiska dokumintiyada waxaad u baahaneysaa markii aad codsatid, booqo [www.coverva.org](http://www.coverva.org) oo riix bogga Codsashada. Waxaa lagu weydiinayaa inaad bixisid cadeynta heerka socdaalka carruurta haddii aysan aheyn muwaadaniin Mareykanka ah. Haddii canugaaga uu yahay muwaadin Mareykanka ah, waxaa lagu weydiinayaa inaad siisid canugaaga lambarka Amniga Bulshada ee ku yaalo codsiga.